

MUDAAHARAAD KA DHACAY AARHUS DENMARK.

Mudaaharaad looga soo horjeedo Ciidamada Ethiopia iyo Dhibaatada ay ku hayaan umdda soomaaliyeed oo ka dhacay Magaalada Aarhus, Denmark.

Waxaa markay taariikhdu ahayd 25. may 2007 waa maalintii jimdada ee lasoo dhaafaye ka dhacay Caasimadda labaad ee Waddanka Denmark ee Aarhus Mudaaharaad aad u balaaran oo looga soo horjeedey ciidamada Tigreega ee sida gardarada ah ugu soo duulay dalka soomaaliya dhamaadkii sanadkii lasoo dhaafey ee 2006 iyo Xasuuqii ay ka gaysteen dalka soomaaliya guud ahaan, gaar ahaana magaalada Muqdishu.

Mudaaharaadkaan ayaa wuxuu ka dhacay irridda hore ee guriga magaalada Aarhus laga xukumo ee looyaqaan (Rådhuset).

Mudaaha raadkaan ayaa waxaa ka soo qayb galay dhamaan qaybaha kala duwan ee ay ka koobantahay bushadu.

Waxaa kale oo kasoo qayb galay bulsho farabadan oo Daanish ah oo iyagu markaas la tacaadufaayay Soomaalida halkaas ku mudaaharaadayay, iyagoo aad ula dhacsanaa weedhaha ay ku dhawaaqayeen iyo kuwa tabeelayaasha ugu qornaa.



Waxaa kale oo ka soo qayb galay wax garad iyo aqoonyahano soomaaliyeed oo halkaas hadalo kooban ka soo jeediyeey.



Waxaa kale oo ka soo qayb galay qaar ka mid ah ururrada ethipian-ka ah oo ka soo horjeeda rajiimka Meles Zinawi iyagoo halkaas labo kamid ah ay ka hadleen.



Dhalin yaro soomaaliyeed

Waxaa ka soo qayb galay dadka ku lugleh siyaasadda gobolkan oo metelayay xisbiyada siyaasadda.

Waxaa dadkan ka mid ahaa Ibrahim Gökhan oo ah nin turki ah oo xildhimaan ka ah Golaha deegaanka ee Gobolkan aalborg.



Ibrahim

Waxaa isku soo dubaridey Mudaahadaaskaan ururada soomaliyeed ee Magaalada Aarhus iyo dhamaan wadankan Denmark oo dhan. Oo ay weheliyaan ururada siyasadda waddankan qaybo kamid ah, iyo weliba ururada aan dowliga ahayn(NGO) ay ka mid yihiin STS international solidarity.

Waxaa kale oo halkaas hadalo aad iyo aad loogu riyaaqay oo dadka soo jiitey ka jeediyey Vagn Rasmussen oo ah nin waxbadan ka war haya arimaha soomaaliya marar badan na tegey gudaha soomaaliya. Siiba sanadihii ugu dambeeyey. Vagn wuxuu aad uga hadlay siyaasadda guraca ee hadda ka jirta dalka soomaaliya . Wuxuu kale oo aad uga hadlay siyaasadda ey ka damacsan yihiin US iyo Ethiopia dalka soomaaliya. Wuxuu kale oo kahadlay dagaal oo gayaasha ka shaqeeya soomaaliya maanta.



Vagn Rasmussen

Waxaa kale oo isna hadal yar oo kooban kajeediyeey wiil dhalin yaro ah oo metelayay xisbiga layiraahdo, Enhedslisten oo ah xisbi kamid ah xisbiyada mucaaradka ku ah dowlada hadda ka talisa Wadankan oo aad uga soo horjeeda dagaalada ay US saaxiibadoodu ku hayaan dunida muslimka. Wiilkan oo lagu magacaabo Lars Henriksen ayaa wuxuu sheegay inay aad uga soo horjeedaan dagaalka ay US iyo Ethiopia ku qaadeen soomaaliya. Wuxuuna sheegay inay damacsan yihiin in xisbigoodu ku darsado mustaqbalka siyaasadeed ee soo dhow arimaha soomaaliya.



Waxaa kale oo isna hadal dheer iyo gabu isugu jira oo aad loo la dhacay halkaas ka soo jeediyey Ahmed Ducaale oo ah wax garadkii kasoo qayb galay mudaaharaadkan.

Ahmed oo marna Afka denish –ka marna afsoomaali ku hadlayay ayaa aad iyo aad ula dhaceen ka sooqayb galayaashu hadalkiisa, waayo wuxuu ka hadlay xaqqiiqada lala damacsanyahay soomaaliya maanta iyo siyaasadda guracan ee ka jirta.

- *Somalisk Familjeforening,*
- *Somalisk Kulturforening,*
- *Somalisk Seniorforening,*
- *Somalisk kvindeforening,*
- *Somalisk IFTIN forening,*
- *STS Somalia Solidarity,*
- *Foreninger fra København,*
- *Aalborg og Odense, og*
- *Enhedslisten Anti-racistisk Gruppe, Århus.*

Ahmed Jibril
ahmed@jibril.eu